

Kaalmo ilmaha guriga ka helo waxbarasho elektroonig (etäopetus)

Ilmo kasta hadda waxay u tahay waqti khaas oo waxbarasho Ilmaha iyo dhalinyarada waxay sida u horeysa ku qaadanaayan guriga waxbarasho elektroonig (etäopetus).

Waxbarasho fasal waxaa loo dhigaa fasallada 1-3 ardayda dhigto iyo ardayda waxbarashada ugu horeeya (esiopetus) ku jiraan. Ardayda helay go'aan kaalmo gaar iyo ardayda waxbarashada waajib dheeraad waxaa loo hagaajin karaa waxbarasho fasal haddii loo baahnaado. Weliba ardayda waxbarashada asaasiga kugu diyaarinayo ardayda waxay ku dhigan karaan iskuulka 14.4.2020 billowkiisa. Kulli ardayda waxay xaq u leeyihiin in ay helaan waxbarasho elektroonig (etäopetus), haddii ay waalidkood codsadaan. Talo oo tallaabo ugu horeeya waxaa waaye in ay ardayda kulli guriga waxbarasho elektroonig (etäopetus) ku qaadaan.

Shaqada iskuulka iyo waxbarasho guriga lugu qaado wahay noqon karaan wax adag. Iskuulyaasha waxay hadda ku jiraan dadaal sida ay shaqada iskuulka si wanaagsan u socdo. Arrintan waxa waaye arrin kulligeen ku cusub, saas oo ah waxaa muhiim ah in aa la aamina in oo qof kasto hoosha ugu fiican qabanayo. Kor iyo hoos ilmaha iskuulka way ku laabanayaan.

Waxaa muhiim ah in la helo hab wax lagu barta iyo hab cashar guriga lagu sameeyo. Halkaan waa kan, tilmaamo ardayda ka kaalmeeyo waxbarashada elektroonig (etäopetus) ee guriga lagu dhigto.

- ✓ Iskuulka wuxuu mas'uul ka yahay waxbarashada. Kulli waalidiin ma haystaan hanti ay ku kaalmeeyaan waxbarashada ilmaha, tusaale ahaan kas la'aanta afafka finnish iyo iswiidhis awgiis. Macallimiinta wahay diyaar u yihiin su'aallo iyo caawinaad.
- ✓ Haddii ilmahaga haysan kombiyuutar, waxaa lagu xiriiri karaa telefoon-gacanta (mobilephone). Haddii guriga aysan oollin alaab gaar ah, iskuulka la soo xiriir.
- ✓ Ilmahaga la eeg tilaamo iskuulka ka yimid. Ilmahaga kaalme sida uu la socdo tilmaamayaasha iyo sida isaga la xiriira macallimiinta.
- ✓ Hubi in uu ilmahaga haysto wixii waxbarashada ku saabsan oo sidiisaba iskuulka ku isticmaalo.
- ✓ Ilmaha la hadal iyo la qorshay jadwal. Xasuuso ahaan meel ku qoro jadwalka iyo kaalmo ahaan isticmaal sawirro Jadwalka dhigo meel laga arki karo oo lagu garto.
- ✓ La dalbo ilmahaga meel oo guri ku yaalo oo si wanaagsan uu cashar ka shaqeyn karo oo yaalo material-ka waxbarashada. Saas wuxuu keenaa badbaadin iyo nabad waxbarasho.
- ✓ Ka fikir waqtiga ilmaha oo sii wadi karo shaqada waxbarashada. Waqtiga loogu talaggalay shaqada waxbarashada guriga wuxuu noqon karaa waqti ka sii yar waqtiga iskuulka loogu talaggalay.
- ✓ Ilmahaga wuxuu dareemi karaa in uu keligiisa yahay markii uu ku dhexjiro cashirro iskuulka. Saas oo ah, waxaa roon in oo ilmaha la taageero sida uu isugu cashar la sameeyo ardayda saaxiibbadiisa Isla wax qabsada waxa waaye wax farax leh!

- ✓ Waqti filan bannaanka ku qaado. Soo socod iyo jimicsi iyo ciyaar dheelid wuxuu yahay qayb muhiim ah ka mid waxbarashada elektiroonig (etäopiskelu).
- ✓ Xaqiiji nidaam dab eh waqtiga waxbarashada kadib oo la daawado iskiriinka.
- ✓ Dareenka ilmaha la soco iyo ujeeddo u xaqiiji si toos ah. Tusaale ahaan haddii ilmo maalinta ugu dambeysa tamar (energy) u harin oo ku sameeyo cashar, wuxuu sameyn karaa goor dambe. Macallimiinta ardayda goor dambe way caawinayaan sida ay la qabtaan waxbarashada wixii xilligan ay baran.
- ✓ Kulli dadka guriga joogo waxa waaye in ay qiimeeyaan waqtiga ilmaha qaadanaayo cashar. Qoyska waxaa saaran waajib oo in ay ilmo u abuuraan nabad-niyadda iyo nabad cashar oo ku shaqeyn lahaa.
- ✓ Xaddii aad dareento welwel oo ku saabsan waxbarashada ilmahaga ama ladnaansho, la xiriir iskuulka. Haddii welwel kan ugu hore uu yahay waxbarasho la xiriir macallinkiisa. Haddii ka jiro welwel ladnaanta ilmahaga la xiriir cilimafsiiga iyo kurator-ka iskuulka.

Qoraalkaan wuxuu ka faa'ideystay qoraalka Lärums Fredrika Nyqvist oo ah agaasimaha cilmi-waxbarasho (pedagogical director), Förbundet Hem och Skolan iyo ururka waalidiinta Finland (Suomen Vanhempainliito).